Bulshada PPS ee Qaaliga ah,

Toddobaadkii hore, Isbahaysiga Hagidda Koonfur-Bari (SEGC)—koox ka kooban waalid, xubnaha bulshada ee mutadawaciinta ah iyo maamulayaasha ay soo wakiisheen Guddiga Waxbarashada ee PPS – ayaa yeeshay kulankoodii u dambeeyay si ay u doortaan soo jeedinta furitaanka Harrison Park MS iyo horumarinta diiwaangelinta dhowr dugsiyada SE ah. Waxay u codeeyeen inay ku talliyaan isbeddelada goobta barnaamijka iyo soohdimaha ee si faahfaahsan loogu sharaxay hoos. Soo jeedintoodu waxay hadda u gudbi doontaa Ku-xigeenka Kormeeraha Guud Claire Hertz, taas oo tallo u soo jeedin doonta Guddiga Waxbarashada ee PPS kahor Abriil 29. Guddigu waxay tallo-bixinteeda ka doodi doonaan 10-ka May, waxaanay codayn doonaan 24-ka May. Dhamaan isbeddellada ay ansixiyaan Guddigu waxay bilaabmayaan **Deyrta 2023**.

MAXAA ISBEDDELI KARA?

- Harrison Park K-8 wuxuu u baddelmi doonaa dugsi dhexe, ardaydiisa K-5 waxay dhigan doonaan dugsi hoose oo cusub oo ku yaal dhismaha Clark (hoyga hadda ee Creative Science School). Marka laga soo yimaado ardaydan xaafada, Harrison Park MS wuxuu ka koobnaan doonaa ardayda xaafadaha ee Vestal iyo Atkinson, iyo ardayda Wax-ku-barshada Shiinayska ee ka socda Harrison Park iyo barnaamijyada Woodstock.
- Creative Science School wuxuu u guuri doonaa Bridger K-5 wuxuuna ku biiri doonaa barnaamijka xaafada ee jiray.
- Barnaamijka Wax-ku-barashada Isbaanishka ee Bridger wuxuu u guuri doonaa Lent K-5, kaas oo noqon doona dugsi luuqad wax-ku-barasho buuxa ah oo leh damaanad qaadka gelitaanka xaafadda Lent ee hadda. Ardayda ku nool xaafada Lent ee aan dhigan barnaamijka Isbaanishka waxay beddel ahaan dhigan doonaan Marysville K-5.
- Inkastoo aysan jirin tirooyin diwaangelineed oo kaamil ah si loo xaqiijiyo in ardaydu ay helaan adeegyo kala duwan oo doorasho iyo taageero ah, waxa SEGC laga codsaday inay raadiso habab ay ku hesho diiwanagelin dugsiga hoose ah oo ka sareysa 270 oo arday iyo diiwaangelin dugsiga dhexe ah oo ka sareysa 500 oo arday, gaar ahaan dugsiyada u adeega arday badan oo midab leh. Qorshaha la soo jeediyay waxa uu u wareejin doonaa xaafada Woodstock iyo qeyb ka mid ah xaafadda Sellwood ilaa aagga uu u adeego Lane, taas oo xoojinaysa diiwaangelinta dugsiga dhexe ee ugu yar gobolka. Isbeddelada soohdinta ee dheeraadka ah ee ay ku jiraan Woodstock, Lewis, Arleta, Marysville iyo dugsiyada hoose ee Glencoe waxay kordhin doonaan diiwaangelinta dugsiyada hoose ee Creston, Vestal, Whitman iyo Woodmere.
- Kellogg Middle School, oo hadda furmay sannadkan, ayaa sidoo kale arki doona isbeddelada soo jeedinta. Baloogyada ugu dhow Kellogg ayaa hadda waxa ay noqon doona qeyb kamid ah aagga uu u adeego; barnaamijka Wax-ku-barashada Isbaanishka ee Mt. Tabor MS-na waxa uu u guuri doonaa Kellogg, taa oo isugu geynaysa dhamaan Wax-ku-barashada Isbaanishka ee gobolka hal dugsi dhexe. Kellogg aad ayuu u weynaan doonaa marka lagu daro kuwan, sidaa darteed soo jeedintu waxay sidoo kale xaafada Creston ka rari doontaa Kellogg waxaanay u rari doonta aagga uu u adeego Hosford. Waxa ay u badantahay in Kellogg uu wali haysan doono diwaangelinta dugsiga dhexe ee ugu saraysa ee gobolka, taas oo walaac wayn u ahayd SEGC.

SIDA AAD WAX BADAN UGA OGGAAN KARTO SOO-JEEDINTA

Waxaad ka heli kartaa tafaasiisha soo jeedinta adigoo eegaya khariidaddan dulmarka ah iyo garaafka hawsha, iyo sidoo kale khariirada faahfaahsan ee dugsi kasta oo hoose iyo dhexe oo uu saameeyay isbeddelka iman kara. Jaantusku wuxuu tusinayaa qiyaasta diiwaangelinta dugsi kasta haddii isbeddeladu ay si buuxda u dhaqangali lahaayeen sannadkan, iyo sannad dugsiyeedka 2025-26, iyo sidoo kale saameynta ay ku yeelanayso kooxaha isirada iyo qowmiyadaha muhiimka ah. Qiyaasahani waxaa loogu talagalay tixraac kaliya, maadaama guddiga ayaa go'aamin doonto in loo oggolaado ardayda inay ku dhameeyaan dugsiyadooda hadda ama la kordhiyo soohdimaha iyo isbeddelada barnaamijka. Waxaad ka arki kartaa dhammaan waxyaabaha mareegtayada

Marka guddigu go'aamiyo isbeddellada, qorsheyntu ayaa bilaabmi doonta si loo hubiyo in gaadiidka, shaqaaleysiinta iyo taageerada bulshada ee mustaqbalka iyo baahiyaha kale ee fulintu ay jiraan bilowga sannad dugsiyeedka 2023-24.

FIKIRKAAGA WADAAG

Ku-xigeenka Kormeeraha Guud iyo Guddiga Dugsigu waxay sii wadaan ururinta tallooyinka daneeyayaasha ee laga yaabo inay saameeyn ku yeeshaan isbeddeladu. SEGC waxay xustay in wali la horumarin karo qorshaha. Fadlan isticmaal sahankan si aad fikradaada uga dhiibato soo jeedinta.

HANAANKA SEGC

Soo jeedintani waxay natiijada shaqo badan oo ay sameeyeen bulshada PPS ee heellan. SEGC waxay kulmeen labadii sanno ee la soo dhaafay si ay u horumariyaan qorshaha diiwaangelinta iyo dheelitirka barnaamijka ee Koonfur-bari Portland. Hanaanka waxa carqaladeeyay masiibada waxaanay u baahatay shirar onlayn ah xilligaas. Shaqadu waxa loo qeybiyay laba qeybood, iyadoo Wajiga Kowaad uu siinayay qaab u gudbin oo bilow ah Kellogg Middle School. Wajiga Labaad, Guddigu waxa uu ka codsaday SEGC in ay abuuraan qorshe lagu dheelitiro diiwaangelinta, kor loogu qaado isticmaalka xarumaha, laguna taageero u helista barnaamijyada iyo adeegyada si siman, oo ay ku jiraan:

- Aagga u adeegista iyo meelaynta barnaamijka gaarka ah ee Harrison Park Middle School
- Qorshe lagu raro ardayda K-5 iyo barnaamijyada hadda lagu bixiyo Harrison Park
- Qorshe lagu kordhinayo diiwaangelinta Lane Middle School

Isbahaysiga waxaa lagula talliyay in ay ka shaqeeyaan dugsiyo gaar ah, waxaana la siiyay tilmaamo ku saabsan ikhtiyaarka diiradda iyo barnaamijyada wax-ku-barashada luuqadda. Intii ay waday shaqadeeda, SEGC waxay tixgelisay jawaab celin ballaaran oo ay PPS ka soo ururisay xubnaha bulshada, tallooyinka khubarada tacliinta iyo diiwaangelinta ee PPS, iyo xogta saameynta la saadaaliyay ee ay yeelan karaan xalalka kala duwani. Isku soo wada duuboo, SEGC waxay tixgelisay 17 soo jeedin waxaanay mid walba ku qiimeysay cabbirka sinnaanta isirka—iyadoo diiradda si gaar ah u saaraysa ardayda Madowga iyo Dhaladka ah.

PPS waxay aad ugu mahadcelinaysaa wax ku biirinta Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari iyo dhamaan xubnaha bulshada ee ka qeybqaatay hanaankan adag si ay gacan uga geystaan dhisida dugsiyo xooggan oo loogu talagalay dhamaan ardaydeenna.